

## Su'aalaha badanaa la isweydiyo ee baaritaanka guud ee maydka

Su'aal	Jawaab
Maxay ka dhigan tahay in 'Sarkaalka Baaritaanka maydka uu hadda si rasmi ah u furay baaritaan guud'?	Waxay la macno tahay in Sarkaalka Baaritaanka maydka uu go'aansaday inay jiraan arrimo la xiriira dhimashada weeraradii masaajidka oo aan lagu xallin dacwadaha dambiyada iyo Guddiga Baaritaanka Boqortooyada. Furitaanka baaritaan waxay u oggolaaneysaa baaritaan faahfaahsan oo ku saabsan sababaha iyo duruufaha dhimashada.
Waa maxay baaritaan?	Baadhaha maydka wuxuu qabtaa baadhitaan si uu wax badan uga ogaado meesha, goorta iyo sida qof uu u dhintay. Baadhitaanku wuxuu kaloo ka caawiyaa baadhaha maydka in uu sameeyo talooyin ama faallooyin ka hortagi kara geeri taas la mid ah inay dhacdo mustaqbalka.
Miyuu baaritaanku micnihiisu yahay inay si toos ah u jiri doonto baaritaan hoose?	Maya. Mayd baaraha ayaa go'aaminaya in baaritaan hoose loo baahan yahay iyada oo qayb ka ah samaynta baaritaankooda.
Yaa ku lug yeelan kara baaritaanka?	Xubin kasta oo ka tirsan qoyska Shahiidka, wakiilo sharciyeed, iyo dadka mayd baadhahu uuu u aqoonsaday inay yihiin dhinacyada daneeyaasha ee baadhitaanka maydka ayaa ku lug yeelan kara baadhitaanka.  Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sida loo dalbado si aad u noqoto qof danaynaya weerarada masaajidka ee baaritaanka maydka, fadlan booqo <a href="https://coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process/interested-parties/">https://coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process/interested-parties/</a> .

Su'aal	Jawaab
Waa maxay tillaabooyinka xiga ee baaritaanka?	Mayd baaraha ayaa hadda ka fiirsanaya tillaabooyinka xiga ee baaritaanka. Waxaad la socon kartaa go'aamadan adigoo booqanaya <a href="https://coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process/">https://coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process/</a> .